***Ogeysiiska Dhaqamada Asturnaanta:*** **Taariikhda Dhaqangalka: Maarso 26, 2013; Taariikhda Dib u eegista: Febraayo 1, 2026**

OGEYSIISKAN WAXAA UU QEEXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALO KARO OO LOO SHAACIN KARO IYO SIDA AAD MARIN UGU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH DIB UGU EEG.

Ogeysiiskaan wuxuu sharaxayaa dhaqamada asturnaanta ee qaybaha ururka caymiska isku-dhafan ee xidhiidhka la leh Walmart. Ururka caymiska ee xiriirka la leh waxaa ka mid ah farmashiyaha iyo adeegyada aragga / indhaha ee Caafimaadka & Fayoqabka ee Walmart iyo Caafimaadka & Fayoqabka ee Sam's Club iyo adeegyada Machadka Cilmi Baarista Caafimaadka ee Walmart. Waan fahamsannahay in macluumaadkaaga caafimaadku uu yahay mid shakhsi ahaaneed, waxaana naga go'an inaan ilaalino isaga. Sharciga ayaa nooga baahan inaan ilaalino asturnaanta macluumaadkaaga caafimaadka ilaalsan ("PHI"), si aan kuu siino Ogeysiiskan ah waajibaadkayaga sharciga iyo dhaqamadeena asturnaanta ee ku saabsan PHI-kaaga, iyo inaan kuu soo gudbino wax kasta oo ah ku xadgudub ah oo ku lug leh PHI-kaaga aan badqabka ahayn. Waa inaan raacnaa shuruudaha ogeysiiska ee hadda jira.

**Isticmaalka iyo Shaacinada PHI ee Aan U Baahanayn Oggolaanshahaaga:**: **1. Loogu talagalay Daawaynta.** Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo shaacino PHI-kaaga ujeedooyin daaweyn darteed sida bixinta daaweynta takhtar qoray ama bixinta baaritaannada ama maareynta iyo xidhiidhinta daryeelka caafimaadka guud ahaan hal ama in ka badan oo ah bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaan u shaacino PHI-kaaga dhakhaatiirta daawaynta, bixiyeyaasha, farmashiyayaasha, bixiyeyaasha daryeelka indhaha iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka si aan u maareeyno oo iskugu dubaridno daryeelkaaga caafimaadka ama daaweyntaada. **2. Lacag-bixinta.** Waxaan u isticmaali karnaa oo u shaacin karnaa PHI-gaaga si annaga iyo urarada kale ee caymiska leh ama bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ay kuugu soo diri karaan lacag oo kaaga heli karaan lacag adiga, shirkaddaada caymiska, ama qolo saddexaad. Tani waxaa ka mid noqon kara sameynta hubinada u-qalmitaanka caymiska ee Medicaid-ka gobolka, Medicare, ama qorshayaasha kale ee caafimaadka, ee go'aaminaya heerka isdiiwaangelinta, oona siinaya PHI ururada naga caawiya inaan gudbino biilasha oo aan aruurino lacagaha lagu leeyahay. **3. Hawlgalada Daryeelka Caafimaadka.** Waxaan u isticmaali karnaa oo u shaacin karnaa PHI-gaaga howlgaladeena daryeelka caafimaadka iyo howlgalada daryeelka caafimaadka ee ururada kale ee caymisan kuwaas oo aad la leedahay ama aad la lahayd xiriir, sida maamulka gudaha iyo qorsheynta iyo howlaha hagaajinaya tayada iyo waxtarka kharashka ee daryeelka aan adiga ku soo gaarsiino. **4. Si aan kaagala soo xiriirno wax ku saabsan Badeecooyinka iyo Adeegyada Caafimaadka la Xiriira.** Waxaan u isticmaali karnaa oo u shaacin karnaa PHI-gaaga si aan kaagala soo xiriirno arrimaha ku saabsan daryeelkaaga iyo arrimaha la xiriira, oo ay ku jiraan badeecooyinka iyo adeegyada caafimaadka la xiriira ee aan bixino. Tusaale ahaan, waxaan u isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa PHI-gaaga si aan u bixino ballan iyo xusuusinada ogeysiiska, kuugu wargelino wax ku saabsan badeecooyinkeena iyo adeegyadeena, ama kuugula talino adiga daryeelka ka hortagga ee la heli karo iyo daaweynada kale, oo ay ku jiraan kuwa lagu heli karo fursadaha cilmi baarista. **5. Shakhsiyaadka ku lugta leh Daryeelkaaga ama Lacag Bixinta Daryeelkaaga.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga xubin qoyska ah, qaraabo kale, saaxiib, ama shakhsi kale oo aad adigu aqoonsatay, kaas oo ku lug leh daryeelkaaga caafimaadka ama lacag bixinta daryeelkaaga, hadii aad ogolaato shaacinta tan, waxaad haysatay fursad aad ku diido oo sidaa maadan samayn, ama waxaan ka soo gaarnay duruufaha go'aankayaga xirfadeed in shaacinta ay tahay mid habboon. **6. Sida Uu Sharcigu U Baahan yahay.** Waan shaacin doonnaa PHI-gaaga markaan rumeysannahay in uu nooga baahan yahay inaan sidaas samayno sharciga federaalka, gobolka, ama maxkamadda, ama dalab la mid ah. **7. Si Looga Hortago Khatar Halis ku ah Caafimaadka ama Badqabka.** Waxaan isticmaali karnaa ama shaacin karnaa PHI-gaaga markay lagama maarmaan tahay in laga hortago ama la yareeyo khatar halis ku ah caafimaadka ama badbaadada qofkasta ama dadwaynaha. **8. Hawlaha Kormeerka Caafimaadka.** Waxaan ugu shaacin karnaa PHI hay'ad kormeer caafimaad howlaha uu oggolaaday ama uu sharcigu u baahan yahay sida xisaabinta, baaritaanka, iyo ruqsad bixinta ama hawlaha kale ee lagama maarmaan u ah kormeerka nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada faa'iidada, ama xuquuqda madaniga ah. **9. Caafimaadka Bulshada iyo Badqabka.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga mas'uuliyiinta dowladda ee hawlaha caafimaadka bulshada iyo badbaadada sida ka hortagga ama xakameynta cudurada, dhaawacyada, ama naafonimada, soo gudbinta xadgudubka, dayacaadda, ama rabshadaha guriga, iyo ka bixinta badeeco suuqa ama falcelinada daran ee daawada. **10. Dacwada Maxkamada iyo Maamulka.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga inta lagu jiro dacwad garsoor ama maamul anagoo ka jawaabeyna amar sharci ama geedi socod kale oo sharciga ah. **11. Sharci Fulinta.** Waxaan ugu shaacin karnaa PHI sargaal sharci fulin ujeedooyinka sharci fulinta qaarkood, sida ku soo wargelinta dembi dhismayaasheena ama ka jawaabida su'aalaha sharci fulinta ee sharciga ah. **12. Shaqooyinka Dawladda ee Gaarka ah.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga: (1) hadii aad ka tirsan tahay ciidamada militariga, sida ay mas'uuliyiinta taliska militariga u baahan yihiin; (2) hadii aad tahay maxbuus ama xabsi ku jirto, machad dhaqan celin ama sarkaal sharci fulin; (3) anagoo ka jawaabayna codsi ka yimid sharci fulinta, oo waafaqsan shuruudo gaar ah; (4) Sababo amniga qaranka awgeed oo sharciga uu oggolaaday; (5) saraakiisha federaalka ee ogolaanshiyaha la siiyay si ay u ilaaliyaan Madaxweynaha, dadka kale ee ogolaanshiyaha la siiyay, ama madaxda dowladaha ajnabiga ah. **13. Magdhowga Shaqaalaha.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga anagoo u hogaansamayna sharciga gobolka ee la xiriira magdhowga shaqaalaha, ama barnaamijyada kale ee la midka ah. **14. Ku deeqida Xubnaha iyo Unugyada.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-kaaga iibsiga xubnaha ama ururada la midka ah ujeeddooyin ku deeqid ama ku talaalid. **15. Baarayaasha iyo agaasimayaasha aaska.** Waxaan u shaacin karnaa PHI agaasimaha guriga aaska, baaraha ama baaraha caafimaadka si waafaqsan sharciga khuseeya si aan ugu suurtagelino inay fuliyaan waajibaadkooda. **16. Wakiillada Shakhsi ahaaneed.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga qof si sharci ah loogu oggolaaday in uu adiga ku matalo, sida waalidka, wakiilka sharciga ah, ama maamulaha ama fuliyaha hantidaada. **17. Caddaynta Tallaalka.** Waxaan siin karnaa caddaynta tallaalka dugsiga ee ku saabsan arday ama arday mustaqbalka ah, sida sharcigu u baahan yahay, hadii uu oggolaaday waalidka/mas'uulka, cunug ka xaroobay mas'uuliyada waalidkooda, ama qof kale oo ogolaansho haysta, sida ay u khuseyso. **18. Cilmi baarista.** Waxaan u isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa PHI-gaaga si la xiriirta ujeeddooyinka cilmi baarista ee soo socota: (1) iyadoo la raacayo ka dhaafitaanka uu sameeyo guddi dib u eegis machad ama guddi asturnaan; (2) iyadoo la isku diyaarinayo cilmi baarista; iyo (3) xogta aan aad loo aqoonsan karin (PHI taas oo laga saaray macluumaad badan oo qofka lagu aqoonsan karo). **19. Asxaabta Ganacsiga.** Waxaan u shaacin karnaa PHI-gaaga Asxaabta Ganacsiga ee aan qandaraaska siinay si ay noogu qabtaan adeegyo qaarkood, sida biilasha ama adeegyada maamulka.

**Isticmaalka iyo Shaacinta PHI ee u Baahan Oggolaanshahaaga:** Marka laga reebo sida halkan lagu sharaxay, ma isticmaali doonno ama ma shaacin doonno PHI-gaaga oggolaanshahaaga la'aantiis ama sida kale uu sharciga ogolaaday. Waxaad ula laaban kartaa oggolaanshahaaga qoraal ahaan wakhti kasta sida lagu tilmaamay oggolaanshaha ama adoo u qoraal u diraya U Hoggaansanaanta HIPAA, 1 Customer Drive, Mailstop 0230, Bentonville, AR 72716. Ka laabashadaada waxay joojin doontaa sii isticmaalka ama u shaacinta PHI ujeeddooyinka lagu qeexay oggolaanshahaaga aad saxiixday, marka laga reebo ilaa xadka aan horay uga tilaabo qaadnay iyadoo la tixgelinayo oggolaanshaha noocaas ah ama sharciga naga mamnuucay. Sidoo kale waa inaan raacnaa sharciga khuseeya oo ka adag HIPAA. **1. Iibinta PHI.** Ma iibin doonno PHI-gaaga iyadoo aan oggolaanshahaaga qoraalka ah la helin, ama sida ay HIPAA ogolaatay. **2. Qoraallada Daaweynta Dhimirka.** Marka laga reebo xaalado xaddidan, ma isticmaali karno ama ma shaacin karno qoraallada daaweynta maskaxeed oo uu diwaangeliyay xirfadle caafimaad oo maskaxeed oo diwaangelinaya wada sheekeysigaaga inta lagu jiro kulanka la-talinta oggolaanshahaaga la'aantiis. **3. Suuqgeynta.** Waa inaan helnaa oggolaanshahaaga qoraalka ah ka hor inta aan loo isticmaalin ama loo shaacin PHI-gaaga ujeeddooyin suuqgeyn. **4. Ujeeddooyinka Cilmi baarista.** Waxaan ugu isticmaali karnaa ama ugu shaacin karnaa PHI-gaaga ujeeddooyinka kale ee cilmi baaris ee aan kor lagu sharaxin oggolaanshahaaga oo keliya.

**Qeybta 2-aad Diiwaanada Barnaamijka:** Waxaan ka heli karnaa PHI-gaaga barnaamijka khalkhalka isticmaalka maandooriyaha oo ay ku jiraan macluumaad waafaqsan 42 CFR Qeybta 2-aad ("Qeybta 2-aad") ee maamula sirta diiwaanada cudurada isticmaalka maandooriyaha. Qeybta 2-aad waxay siisaa ilaalin qarsoodi oo dheeraad ah diiwaanada cudurada isticmaalka maandooriyaha ee aan ka helno barnaamijka Qeybta 2-aad. Ma isticmaali doonno ama ma shaacin doonno diiwaanada xanuunka isticmaalka maandooriyaha ee aan ka helno barnaamijka Qeybta 2-aad, ama markhaatiga gudbinaya nuxurka diiwaanada noocaas ah, ee madaniga ah, dembiyada, maamulka, ama geedi socodka sharci dejinta ee adiga ka dhanka ah ilaa ay ku salaysan tahay oggolaanshahaaga qoraalka ah ama amar maxkamadeed kadib ogeysiis iyo fursad dhageysi lagugu siiyo adiga ama qofka haya diiwaanka. Amarada maxkamadeed oo oggolaanaya isticmaalka ama shaacinta waa in ay la socoto qoraal maxkamadeed ama shuruud kale oo sharci ah oo qasbaysa shaacinta ka hor inta aan diiwaanada la codsaday la isticmaalin ama la shaacin.

**Waxaad u leedahay xuquuqaha soo socda si la xiriirta PHI-gaaga:** 1. Waxaad codsan kartaa xaddidaado ku aadan isticmaalka ama u shaacinta PHI-gaaga daaweynta, lacag bixinta ama howlaha daryeelka caafimaadka, ama shaacintayada PHI-gaaga qof ku lug leh daryeelkaaga ama lacag bixintaada daryeelkaaga, sida xubin qoys ama saaxiib. Na loogama baahno inaan ogolaano. Hadii aan oggolaano, waan u hoggaansamin doonnaa codsigaaga marka laga reebo xaalado degdeg ah qaarkood ama sida sharcigu uu u baahan yahay. 2. Waxaad codsan kartaa xaddidaado ku saabsan shaacinada qaarkood ee PHI-gaaga ee qorshahaaga caafimaadka oo ah ujeeddooyinka fulinta daaweynta, lacag bixinta ama howlgalada daryeelka caafimaadka ee la xiriira adeegyada loo bixiyo si buuxda (oo jeebka laga bixiyo). 3. Waxaad baari kartaa oo aad heli kartaa nuqul ka mid ah diiwaanadaada ku jirto diiwaanadeena la aqoonsan yahay ama aad nagu hagi kartaa inaan siino wakiilkaaga. Xaalado xaddidan awgood, waxaan kuu diidi karnaa marin u helka qeyb ka mid ah diiwaanadaada. Hadii aad codsato nuqulo, waxaan kugu dallaci karnaa khidmad nuqul oo macqul ah. 4. Waxaad codsan kartaa inaan wax ka beddelno PHI gaar ah hadii ay khaldan tahay ama aysan dhameystirnayn. Waa in aad bixisaa sabab si aad u taageerto codsigaaga. Waan diidi karnaa codsigaaga hadii PHI uu sax yahay, oo dhameystiran yahay ama uusan qayb ka ahayn PHI la haysto ama loogu talagalay bixiyaha ay khusayso. Hadii aan diido codsigaaga, waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso bayaan ama khilaaf. Codsigaaga wuxuu qayb ka noqon doonaa diiwaankaaga caafimaadka, oo lagu dari doonaa markaan u samayno shaacin shaqayga ama bayaan aad aaminsan

tahay in uunsan dhameystirneyn ama sax ahayn. 5. Waxaad codsan kartaa xisaabin ah shaacinta PHI-gaaga. Kani waa liiska shaacinta laga sameeyay PHI-gaaga, marka laga reebo daaweynta, lacag bixinta ama howlgalada daryeelka caafimaadka, iyo ka dhaafinada kale ee uu sharciga ogolaaday. Codsigaagu waa in uu cadeeyo muddo wakhti, oo aan ka badnayn lix sano laga bilaabo taariikhda codsigaaga. 6. Waxaad codsan kartaa inaan kuula soo xiriirno hab gaar ah ama goob gaar ah. Tusaale ahaan, waxaad codsan karta inaan kugula soo xiriirno oo keliya goobta shaqada ama deegaan kale ama sanduuqa boostada. Codsigaaga qoraalka ah waa in uu muujiyaa sida ama meesha aad rabto in lagaala soo xiriiro. Waxaan bixin doonnaa codsiyo macquul ah. Hadii aad rabto in aad isticmaasho mid kasta oo ka mid ah xuquuqahan, la xiriir Walmart ama goobta Sam's Club ee bixiya adeegyadaada si aad u hesho foomka ku habboon, ama aad ugu gudbiso codsi qoraal ah HIPAA Compliance, 1 Customer Drive, Mailstop 0230, Bentonville, AR 72716. Waxaad nuqul warqad ah ka heli kartaa Walmart, Sam's Club, ama onleenka barta: https://corporate.walmart.com/privacy-security/notices.

**Adeegyada Caawinta Luuqada iyo Qalabyada ama Nidaamka Caawiyo Dadka Naafanimada Qabo**: Sida ku xusan qeybta 1557 ee Sharciga Daryeelka la Awoodi karo, waxaannu bixinaa adeegyo caawimaad luuqad iyo qalabyada ama nidaamyada caawiyo dadka naafanimada qabo iyo adeegyo marka la codsado iyo iyadoo lacag la'aan u ah macaamiisha iyo xubnaha iyo bukaannada, kaqeybqaadayaasha, ka-faa'iideystayaasha, dadka diwaangashan, iyo codsadayaasha barnaamijyadeena caafimaadka, howlaheena, ama adeegyadeena.

**Isbeddelada Lagu sameeyay Ogeysiiskan:** Waxaan xaq u leenahay inaan wax ka beddelno Ogeysiiskan iyo inaan ka dhigno Ogeysiiska dib loo eegay mid waxtar u leh PHI ee aan horeyba u haysanno ama aan mustaqbalka helayno. Waxaannu boosti gareyn doonnaa nuqul ka mid ah Ogeysiiska hadda jira. Haddii aan beddelno Ogeysiiskeena, waxaad heli kartaa nuqul Ogeysiiska dib loo eegay ah markaad codsato ama ka heli kartaa onleenka barta: https://corporate.walmart.com/privacy-security/notices.

**Si Aad U Hesho Macluumaad Dheeraad ah ama U Dacweyso Dhibaato:** Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan Ogeysiiskan, la xiriir HIPAA Compliance, Walmart Inc., 1 Customer Drive, Mailstop 0230, Bentonville, AR. 72716, or phone (800) WAL-MART. Hadii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada gaarka ah lagu xadgudbay, waxaad gudbin kartaa qoraal cabasho ah, mana jiri doono aargudasho, iyadoo Sarkaalkayaga U Hoggaansanaanta HIPAA uu joogo cinwaanada kor ku xusan, ama Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah.

**Sawir Koodhka QR ee noocyada dhijitaalka ah ee kuwan iyo Ogeysiisyada kale ee Caafimaadka iyo Fayoqabka**